# Hagahaaga Daryeelka bulshada Dadka waaweyn ee Manchester

**Helitaanka kaalmada daryeelka bulshada iyo taageer**
Waxaa laga yaabaa inaad daryeel bulsho u baahtid ka dib markii aad dhacdey ama shil ku helay, markaad qaliin ka soo kabanayso, markaad xanuunsan tahay, naafanimo, ama isbeddel weyn oo noloshaada kugu dhacay oo aad markaas u baahan tahay gargaar iyo taageero dheeraad ah.

Haddii adiga, ama qof aad taqaan oo da'diisu tahay 18 ama ka weyn uu u baahan yahay daryeel iyo taageero oo uu ku nool yahay aagga ay hoos yimaadaan Golaha Magaalada Manchester, waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa talo, macluumaad, iyo qiimaynta baahiyahaaga. Waxaan kaala hadli doonaa xaaladaada waxaana ku weydiin doonaa su'aalo si aan u fahanno sida aad hadda u maareyso iyo waxa laga yaabo ee aad u baahan tahay.

Waxaan arintan sameyn doonaa xitaa haddii aad doorato inaad adigu iska bixiso adeegyada.

Waxaan sidoo kale ku siin doonaa talo, macluumaad, iyo qiimeynta baahiyahaaga haddii aad daryeesho qof kale – haddii ay doorbidaan ama haddii aysan rabin in iyaga lagu sameeyo qiimentan.

Nagala soo xiriir

Websaaydka www.manchester.gov.uk
Wac 0161 234 5001

| | |
|---|---|
| Email | mcsreply@manchester.gov.uk |
| SMS Text | 07860 003160 |
| Sign-video Websaaydka | www.manchester.gov.uk/signvideo |

Waxaa kale oo aad ka heli kartaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan adeegyada gaarka ah ee aanu bixino websaaydka Ururka Daryeelka Deegaanka ee Manchester (Manchester Local Care Organisation) – www.manchesterlco.org/social-care-citywide/

Ururka Daryeelka Deegaanka ee Manchester waa ururka shuraakada Manchester oo ka tirsan golaha iyo NHS. Daryeelka bulshada ee dadka waaweyn iyo adeegyada caafimaadka bulshada waxaa lagu bixiyaa sida hoos timaada magaca Ururka Daryeelka Maxalliga ah ee Manchester haddaba waxaa laga yaabaa inaan midani ku aragto magaca Golaha Magaalada Manchester.

Waxa kale oo aad faahfaahinta adeegyada iyo taageerada ka heli kartaa hagaha adeegga khadka - Help and Support Manchester
www.manchester.gov.uk/helpandsupportmanchester

**Sida aan u caawin karno**
Si aad ugu qalanto taageeradeena daryeelka bulshada, waxaad u baahan tahay in lagu qiimeeyo shuruudaha u-qalmitaanka qaranka ee ku jira sharciga daryeelka 2014.

Haddii aadan buuxin shuruudaha, waxaan wali ku siin doonaa macluumaad iyo talo waxaanan waxaana kaa caawin doonaa inaad hesho adeegyada bulshada dhexdeeda. Adeegyadan qaarkood waxaa laga yaabaa inay bilaash yihiin, waxayna kugu farxad gelin karaan, yihiin kuwo wax soo saar, iyo madax bannaan intii suurtagal ah.
Waxa kale oo laga yaabaa in aanu ku siin karno qalab, iyada oo aan loo baahnayn qiimayn buuxda, haddii ay taasi dabooli doonto baahiyahaaga. Waxaan ugu yeernaa Daryeelka Awood-siinta Tignoolajiyada (TEC), kaas oo tixraacaya tiro qalabyo iyo apps ah oo aad isticmaali karto si ay kaaga caawiyaan inaad si badbaad iyo madax-banaani aad guriga ku ahaatid, shaqada ama bulshada deegaankaaga. Qalabka waxa bixiya Kooxda Alarms Community iyo Technology Enabled Care Team (CATEC) ee Golaha Magaalada Manchester.

Waxaa jira noocyo kala duwan oo qiimeyn ah oo aan ku bixin karno marka aan wax badan ka ogaanno baahiyahaaga iyo xaaladda hadda jirta. Tusaale ahaan, Kooxdayada Taageerada Hore ee Dadka Waaweyn ayaa ku siin doona taageero badheedh ah ama macluumaad, talo, ama hagitaan si ay kuugu suurtagasho inaad si fiican ugu noolaato oo aad noqoto qof u madax banaan guriga. Waxay kugula shaqaynayaan ilaa shan maalmood, iyagoo ku siinaya daryeel, taageero, iyo tilaam bixin. Waxay kaala hadli doonaan xaaladdaada waxayna ku weydiin doonaan su'aalo si ay u fahmaan sida aad hadda u maareyso iyo taageerada aad u baahan tahay. Taageerada aad u baahan karto waxa ku siin kara daryeelka bulshada ee dadka waaweyn ama hay'ad dheeraad kale.

Ama waxaan go'aansan karnaa inaad ka faa'iido ka heli karto Reablement ama taageerada Kooxda Dhisida Madax-bannaanida. Tani waxay ku siinaysaa daryeel muddo gaaban ah, oo degdeg ah si ay kaaga caawiso inaad dib u soo ceshato madax-banaanidaada, adoo isticmaalaya taageero, hagitaan, waxbarasho iyo inta badan qaybo yaryar oo qalab ah si ay kaaga caawiyaan inaad maamusho. Kooxda Reablement iyo taageerada Dhisida bannaanida kuma habboona qof kasta waxayna ku xidhan tahay baahiyaha aanu aqoonsanno muddada qiimayntaada.

Haddii aad buuxiso shuruudaha, waxaanu samayn doonaa qiimayn maaliyadeed ka hor adeegga si aanu u ogaano kharashka ugu badan, haddii ay jiraan, laga yaabo inaad bixiso. Markaa waxaanu kula shaqayn doonaa si aanu u go'aamino adeegyada aad ka faa'iidaysanayso si aad u daboosho baahiyahaaga joogtada ah. Tan waxaa ka mid ah in la go'aamiyo inta ay le'eg tahay qiimaha adeegyadaas - xitaa haddii aad doorato inaad adigu iska bixiso kharashka adeegyadaas.

Haddii aad maalgeliso daryeelkaaga, (badanaa loo yaqaan 'is-maal-galiye') waxaad xaq u leedahay inaad naga hesho talo iyo macluumaad kaa caawiya inaad go'aansato fursadaha ugu fiican. Khiyaarooyinka waxaa ka mid noqon kara, laakiin kuma koobna:

- **Daryeelguri** - waxay ku siisaa daryeelka shakhsi ahaaneed/bulsho ee gurigaaga (sidoo kale loo yaqaan daryeelka guriga).
- **Daryeelka guriga** - wuxuu ku siinayaa guri leh daryeel shaqsi/bulsho oo goob ahaan 24-7.
- **Adeegyada maalinlaha ah** - waxay bixisaa hawlo badan oo madadaalo leh si kor loogu qaado madax-banaanida, caafimaadka, iyo ladnaanta.
- **Goob nololeed ee la taageero** - waxay ku siinaysaa guri taageero dheeraad ah si ay kaaga caawiso inaad si madaxbanaan u noolaato.

Marka aanu ogaano inaad u baahan tahay daryeel iyo taageero joogto ah, waxaanu ku siin doonaa inaanu samayno qiimayn maaliyadeed. Waxaanu qiimayn doonaa awoodaada aad ku bixin karto kharashka adeegyadaas iyadoo lagu salaynayo duruufahaaga dhaqaale. Tani waxay noqon kartaa qayb, mid, ama dhammaan kharashka xirmada daryeelkaaga. Waxaan sameynaynaa qiimayno ku salaysan nidaamkeena dallacaada.

Waxaad ka heli kartaa wax badan oo ku saabsan nidaamkeena dallacaadda halkan: https://www.manchester.gov.uk/info/100010/social_services/372/paying_for_social_care_and_support.

Waxaad dooran kartaa inaan lagu samayn qiimayntan maaliyadeed, laakiin haddii aad taas samayso, ma awoodno inaan kaa caawinno inaad bixiso wax adeeg ah oo adiga ayaa mas'uul ka ah bixinta dhammaan kharashyadaas.

Haddii baahiyahaagu isbedelaan, waad nala soo xidhiidhi kartaa wakhti kasta si aan dib ugu eegno taageerada aad hesho. Had iyo jeer waanu kula hadli doonaa ugu yaraan 12-kii biloodba mar si aan u hubinno in baahiyahaagu aanay isbedelin.

**Yaa kula soo xidhiidhi doona si ay u qiimeeyaan baahiyahaaga oo kaa caawiyaan inaad samaysato qorshe taageero?**

Bilawga nidaamkaaga qiimaynta, waxa kula soo xidhiidhi doona mid ka mid ah Qiimeeyaha Daryeelka Bulshada ama Shaqaale Bulsho.

Labada shaqaale xirfadleyaal waxa ay wadaagaan oo ay fiiriyaan qaybo ka mid ah qiimeynta asaasiga ah iyo mabaadi'da la xidhiidha halbeegyada ku-dhaqanka ku-salaysan awoodeena, Ku-dhaqanka xoogga-ku-salaysan macnihiisu waxa weeye in la eego waxaad samayn karto iyo sida aan kuugu taageeri karno inaad noqoto qof madax-bannaan intii suurtogal ah. Kuwaani waxay la jaanqaadayaan waxa aan ugu yeerno Habdhaqanka Manchester ee ay shaqaalaheennu ku shaqeeyaan kuwaas oo ah:

**Waxaan ku qaadannaa waqti aan ku dhegeysanno oo aan fahamno**
Waxaan ka shaqeyneynaa inaan fahamno waxa adiga kuugu muhiimsan. Waxaan qiraynaa inaad tahay khabiirka noloshaada, iyo in xalalku inta badan ay adiga kuu taala. Waxaan aqoonsannahay in waqtiga lagu bixiyay dhisidda xiriirro togan uu aasaas u yahay awooddayada inaan si wanaagsan u wada-shaqeyno. Waxaan si firfircoon u dhageysaneynaa, annagoo hubineynaa in tayadaada shaqsiyeed, danahaaga, awoodahaaga, agabyadaada shaqsiyeed, iyo meelaha aad ku fiican tahay la aqoonsaday.

**Annagu ayaanu "leenahay" - kama baqayno inaan isku dayno waxyaabo cusub**
Waxaan ku dabaqnaa rabitaankeena iyo hal-abuurnimadayada si aan uga fikirno sida aan kuugu caawinno inaad hesho nolol macno leh. Waxaan ka fikirnaa dadka ku taageeri kara - qoysaska, shabakadaha bulshada, isku xirka bulshadaada. Waxaan sidoo kale tixgelineynaa sida tignoolajiyadu ay kuugu caawin karto inaad ku noolaato nolol madax-bannaan oo dheeraad ah. Annaga iskama qaadanayno inaad adeeg u baahan tahay.

**Waanu wada shaqaynaa, waana isku kalsoonaan doonaa**
Waxaan ku qaadaneynaa waqti si aan u dhisno xiriir iyo kalsooni si aad noogu noqoto mid furfuran oo daacad ah annaga. Waxaan ku kalsoonahay xukunka asxaabta kale oo aan ka wada shaqeyno si aan u fahanno sida ugu wanaagsan ee aan kuugu caawin karno inaad ku hoggaamiso nolosha aad rabto, anagoo aqoonsanay inaan dhammaanteen kori karno oo aan bedeli karno wixii aan hadda la kulanno.

**Waan ku hanweynahay oo aad ayaan u jecelnahay Manchester**
Waxaan aqoonsannahay sida ay muhiimka u yihiin ilaha bulshada iyo faa'iidooyinka ku xidhidhiyaha xaafadahaaga. Waxaan si firfircoon ula shaqeynaa asxaabta, si aan u wadaagno awoodeena, aqoonta iyo khibradeena oo aan yeelano cilaaqaad kalsooni ah oo naga caawiya inaan is taageerno oo aan is su'aal isweydiino. Maalin kasta waxaa ina dhaqaajiya rabitaankeena si aan u rabno in aan isbeddel ku samayno nolosha dadka.

**Waxaan tusineynaa inaan qiimeyno kala duwanaanshaheena oo aan dadka ula dhaqanno si cadaalad ah**
Waxaan qiimaynaa oo aan u xusnaa kala duwanaanshaha magaaladeena iyo xoogsatada, anagoo ula dhaqmayna dadka si cadaalad ah, sharaf iyo ixtiraam leh.

**Maxaa ka dhici doona qiimayntayda?**
Waxaan rabnaa inaan ogaano sida aan kuu taageerno si aad u madax-bannaan u noqotid. Waxaan ku weydiin doonaa su'aalo ku saabsan noloshaada iyo waxa aad jeceshahay inaad sameyso.

**Sideen isku diyaariyaa?**
Ka fakar waxa madax-banaanidu adiga kula tahay. Waxaan ka wada hadli doonaa:

- Maxaa muhiim kuu ah?

- Maxaa hadda si fiican u shaqaynaya?
- Maxaad jeclaan lahayd inaad beddesho?
- Sideed u noqon kartaa madax-banaani dheeraad ah?

Waxaa laga yaabaa inay jiraan waxyaabo aad adigu naftaada u samayn karto haddii qof ku caawiyo inaad barato sida loo sameeyo.

**Yaa kaa caawin kara inaad madax banaan noqoto?**
Waxaa lagu weydiin doonaa haddii ay jiraan dad ama kooxo ku caawin kara. Tani waxay noqon kartaa qoyska, asxaabta, kooxaha deegaanka, ama dadka meesha aad ku nooshahay. Waxaa laga yaabaa inay jiraan waxyaabo Golaha ku siin karo (sida qalab) oo ku caawin kara. Wax badan ayaan kugula socodsiin doonaa inta wadahadalkayaga socdo.

**Maxaa xigi doona?**
Wadahadalkeena ka dib waxaa jiri doona falala aad ogolaatay inaad sameyso. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inay jirto meel ka mid ah bulshada deegaankaaga oo ku taageeri kara danahaaga. Tusaalahan waxaanu ku waydiinaynaa adiga ama taageeradaada inaad la xidhiidho iyaga si aad wax badan u ogaato.

Waxa kale oo jiri kara falal aanu ku heshiinay in aanu samayno. Waxaan ku dadaali doonaa inaan hubino inaad hesho taageerada si aad u caafimaadid oo aad u madax banaanaato, tani waxay noqon kartaa daryeelka guriga, adeegyada maalinta ama adeegyo kale.

**Ma keeni karaa qof kale wada hadalka?**
Waa lagugu soo dhawaynayaa inaad casuunto qof kasta oo ku taageera inuu ku soo biiro wada hadalkeena.

**Yaanu caawin karnaa**
Si laguugu qiimeeyo inaad u qalanto taageerada, waxaad u baahan tahay inaad muujiso in:

1. Baahidaadu ka imanaysaa (ama la xidhiidha) naafo ama jirro jirka ama maskaxeed, iyo
2. Inaadan awoodidin inaad sameeyso laba ama in ka badan oo ka mid ah hawlaha soo socda:

- Cunista iyo cabbitaanka
- Ilaalinta nadaafadda shakhsi ahaaneed
- Maareynta baahiyaha musqusha
- In si habboon dharka u xirto
- Awooda inaad si badbaado leh gurigaaga u isticmaashid
- Ilaalinta deegaanka guriga lagu noolaan karo
- Horumarinta ama ilaalinta qoyska ama xidhiidhada kale ee gaarka ah
- Helitaanka iyo ka qaybgalka shaqada, tababarka, waxbarashada, ama tabaruca

- Isticmaalka tas-hiilaadka ama adeegyada lagama maarmaanka u ah bulshada deegaanka oo ay ku jiraan gaadiidka dadweynaha iyo tas-hiilaadka madadaalada ama adeegyada
- Fulinta mas'uuliyadaha daryeelka ee qof weyni u leeyahay ilmo
- Shuruudahan qaranku waa caadi dalka oo dhan ah, taasoo ka dhigaysa nidaamka mid cadaalad ah. Waxa kale oo ay la macno tahay in ay kuu fududaanayso in aad u guurtid goobaha u dhaxeeya dawladda hoose haddii aad u baahato.

3. Arrimaha aad la kulanto waxay saameyn weyn ku leeyihiin fayoobidaada.

Haddi aanad xaq u lahayn in lagugu taageero sida uu dhigayo xaq u yeelashada sharciga daryeelka, waxa laga yaabaa in aanu wali ku caawin karno. Tan waxa ku jiri kara in aan kuu sheegno adeegyada kale ee degaanka ee bulshada kuwaas oo dabooli kara qaar ka mid ah baahiyaha aad noo sheegtay.

Waxa kale oo laga yaabaa inaad rabto inaad tixgeliso sida qoyska, asxaabta, iyo deriskaagu ay gacan uga geysan karaan daboolida baahiyahaaga, ama waxaad dooran kartaa inaad ka iibsato adeeg bixiyayaasha daryeelka deegaanka haddii aad rabto.

**Lacag bixinta taageerada**
Daryeelka bulshada, oo ka duwan daryeelka caafimaadka, maaha lacag la'aan, markaa ka dib marka la raaco Qiimaynta Baahidaada Daryeelka, taas oo ka shaqaynaysa taageerada aad u baahan tahay iyo inta ay ku kici doonto bixinta, waxaanu dhamaystiri doonaa qiimayn maaliyadeed. Tani waa in lagu ogaado inta kharashkaas ah ee Golaha Magaalada Manchester dabooli karo, iyo inta aad u baahan tahay inaad iska bixiso.

Iyada oo ku xidhan xaddiga dakhliga, kaydka, ama hantida aad haysato, waxa laga yaabaa in aad wax ku darsato qaar ama dhammaan adeegyadaada daryeelka bulshada iyo taageerada. Waxaa jira habraac dawladeed oo ku saabsan inta aad ku yeelan karto kaydka ama hantida ka hor inta aan lagu weydiin inaad bixiso kharashka taageeradaada. Sida dhammaan maamulada deegaanka, waxaa nagu waajib ah inaan raacno xeerarkan.

**Sida aan u xallin doono kharashyada**
Kooxdayada Dallacadu waxay samayn doonaan qiimayn maaliyadeed si ay u xisaabiyaan inta taageero ee aanu ku siin karno daryeelkaaga iyo kharashyada taageerada, iyo inta aad u baahan tahay inaad adigu iska bixiso. Tani waa xisaabin ku salaysan dakhligaaga, kaydkaaga, hantidaada, iyo kharashkaaga.

Tan badanaa waxaa lagu dhammeyn karaa helitaanka Waaxda Shaqada iyo Hawlgabka (DWP), laakiin waxaa laga yaabaa inaan u baahanahay inaan ku weydiinno macluumaad dheeraad ah. Waxa laga yaabaa inaan ku waydiino dakhli kasta oo kale laga yaabaa inaad hesho, kaydkaaga iyo hanti kasta oo aad leedahay. Waxaan sidoo kale ku weydiin karnaa haddii aad leedahay wax

kharash guri ah ama haddii aad qasab tahay inaad bixiso lacag dheeraad ah sababtoo ah arrimo naafo ama jirro awgeed.

Haddii aadan rabin in lagu sameeyo qiimeyn maaliyadeed ama aadan rabin inaad bixiso macluumaadka aan uga baahanahay qiimeynta maaliyadeed, waa inaad bixisaa kharashka daryeelkaaga oo dhan.

**Sida kaydadka loola dhaqmo**
Kaydinta waxaa loola dhaqmaa si la mid ah guryaha la deggan yahay (daryeelka guryaha la dego ama dadka lagu xanaaneeyo) iyo kuwa aan deganayn (daryeelka gurigaaga dhexdiisa, xarun maalmeed ama adeegyada daryeelka nasashada gaaban ee guriga daryeelka) adeegyada daryeelka. Waxaa jira heerka ugu hooseeya ee raasumaalka oo ah £14,250 iyo heerka ugu sarreeya ee £23,250. Kayd kasta oo u dhexeeya heerarkan raasumaalka ah waxa ay keenaysaa tarif raasumaal ah oo ah £1 asbuucii £250 kasta ama qayb £250 lagu daro bixintaada. Haddii aad kayd ka hoosayso £14,250 tani saamayn kuma yeelanayso xisaabinta qiimaynta maaliyadeed. Haddii aad leedahay kayd ka badan £23,250 ma u qalmi doontid taageerada maaliyadeed ee golaha waxaana lagaa doonayaa inaad bixiso kharashka daryeelkaaga oo dhan.

Raasamaalkaaga waxa ku jira kayd, maalgashi, iyo hanti, laakiin kuma jiraan qiimaha guriga aad ku nooshahay.

**Maaraynta miisaaniyadaada taageerada**
Inta lagu jiro qiimeynta baahiyaha, waxaan ku heshiin doonaa heerka taageerada aad u baahan tahay waxaana tan u turjumi doonaa qadar lacag ah oo loo baahan yahay si loo daboolo baahiyahaaga - tan waxaan ugu yeernaa miisaaniyad shakhsiyeed. Markaad ogaato miisaaniyadaada gaarka ah iyo natiijooyinka lagu heshiiyey ee ay bixin doonto, waxaa jira dhowr siyaabood oo aad u maareyn karto taageeradaada.

Waxaad dooran kartaa inaad:

- Lahaato khiyaaro badan oo maamusho daryeelkaaga oo habayso taageeradaada, maamusho miisaaniyadaada, oo adiga iska bixisid wax kasta. Tan waxaan ugu yeernaa lacag-bixin toos ah.
- Aan kuu habaynno taageeradaada heerka miisaaniyadaada oo aan ku bixino dhammaan lacagaha. Wax ku darid kasta oo aad ku bixiso kharashka xidhmadaada taageerada waxa la siinayaa Golaha.

Haddii aad doorato lacag-bixin toos ah, waxaanu haynaa Kooxdayada Lacag-bixinta Tooska ah oo ku taageeri kara si aad u maamusho miisaaniyadaada gaarka ah:

- Kharashka xirmada daryeelka ee miisaaniyadda dhexdeeda si loo hubiyo in shuruudaha iyo taageerada lagu sheegay qorshaha taageerada la buuxiyo, iyo in habayn habboon oo kaabis ah la sameeyo. Tani waxay noqon kartaa taageero rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn, ama labadaba.

- La-talinta hababka dabacsan iyo hal-abuurka ah ee Nolol Madax-bannaan.
- Caawinta shaqaale qorista kuwa raba inay shaqaalaysiiyaan Kaaliyaha Shakhsi ahaaneed (PA). PA waa qof u shaqeeya inuu ku siiyo daryeel iyo taageero si uu kuugu ilaaliyo madax banaanida guriga. Tan waxa ku jiri kara xayaysiis, ururinta foomamka codsiga, diyaarin waraysiyo, iyo in la hubiyo in waraaqaha saxda ah sida hubinta booliska iyo macluumaadka mushaharka ay dhamaantood diyaar yihiin ka hor inta aan la bilaabin shaqada PA.
- Caawinta talada aasaasiga ah ee shaqada iyo bixinta taageero ku saabsan maareynta mushaharka oo ay ku jiraan wax ka qabashada canshuuraha iyo masuuliyadaha Caymiska Qaranka.
- Bixinta talada iyo taageerada habka xisaabinta ee isticmaalka lacag bixinta tooska ah sida looga baahan yahay dawladda hoose.
- Taageerida ilaha daryeelka ee ku haboon haddii loo baahdo iyo in laga caawiyo gorgortanka iyo qorsheynta taageerada iyaga si loo hubiyo in baahiyaha la daboolay.
- Caawinta iyo la-talinta inta lagu jiro habka qorsheynta taageerada iyo wixii ka dambeeya.

Waxaan kaala hadli doonaa fursadahaaga si ay kaaga caawiyaan inaad go'aan ka gaarto.

Waxaan sidoo kale kuu soo diri doonaa nusqada Qorshahaaga Taageerada.

**Maxaa la sameeyaa haddii aadan ku faraxsanayn**
Haddi sabab kastaba ha ahaatee aadan ku faraxsanayn ama aadan ku qanacsanayn taageerada ku jirta qorshahaaga, waa inaad tan la soo hadashaa shaqaalahaaga bulshada ama qiimaynaha daryeelka marka hore. Inta badan khilaafaadka waxaa lagu xalin karaa iyadoo la soo jeediyo welwelkaaga shaqaalahaaga bulshada ama qiimeeyaha daryeelka.

Haddi soo jeedinta arimahaaga Shaqaalaha Bulshada ama Qiimeeyaha Daryeelku aanay ku caawinin in la xaliyo arinta, markaas welwelkaagu waxau u u tagi doontaa Shaqaalaha Bulshada ee Sare ama Maamulaha Kooxda si uu wadahadal kula yeesho.

Haddii arrinta weli aan la xallin, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato. Habka rafcaanku wuxuu ku siinayaa fursad aad ku soo gudbiso xog kasta ama faahfaahin dheeraad ah oo aad dareento inaan la tixgalin inta lagu jiro qiimaynta ama aan la garanayn wakhtiga.


Codsiga rafcaanka waxa loo baahan yahay in lagu sameeyo 10 maalmood gudahooda laga bilaabo kulanka aad la yeelatay Maareeyaha Kooxda Shaqaalaha Bulshada Sare.

Waxaad ka codsan kartaa middaan Shaqaalaha Bulshada Sare ama Maamulaha Kooxda ama Shaqaalahaaga Bulshada ama Qiimeeyaha Daryeelka waxayna la xiriiri doonaan Adeegga Jawaab celinta iyo

Cabashooyinka. Ama waxaad si toos ah ula xiriiri kartaa jawaab celinta iyo cabashooyinka:

Customer Feedback
Corporate Complaints Team
PO Box 532
Town Hall
Manchester
M60 2LA.

Ama wac 0161 234 3012




**Helitaanka taageerada saxda ah**
Iyadoo qayb ka ah qorshahaaga taageerada, waxaad u baahan doontaa inaad noo sheegto waxa muhiimka kuu ah si aad u awooddo inaad keligaa samayso, ama caawimo. Mararka qaarkood kuwan waxaa loogu yeeraa natiijooyinkaaga. Sharci ahaan, daryeel kasta iyo taageero kasta waa in ay kor u qaadaan wanaaggaaga, markaa waan kaala hadli doonaa arrintan.

Markaad ogaato yoolalkaagu waxay yihiin waxaad bilaabi kartaa inaad ka fikirto habka ugu wanaagsan ee aad uga hortagi karto. Tan waxa ku jiri kara caawimada iyo taageerada qoyska, asxaabta iyo deriska, adeegyada bulshada, ama taageerada meelo kale.

Haddii aadan dooran inaad qaadato nidaamka lacag-bixinta tooska ah (halkaas oo aan kaa caawineyno inaad habeyso daryeelkaaga), markaa Adeegga Brokerage wuxuu sameyn doonaa dhammaan qabanqaabada iyagoo adiga ku matalaya. Marka hore, Qiimeeyahaaga Daryeelka Bulshada/Shaqaalaha Bulshada ayaa kula soo saaraya Qorshe Taageero, kaas oo si sax ah u qeexaya waxa taageerada loo baahan yahay, ka dibna sameeyn doonaa qabanqaabo  adeeg bixiyayaasha aanu la shaqayno. Tusaale ahaan, haddii aad u baahan tahay daryeel inaad si madax-bannaan

ugu noolaato guriga, waxay la xidhiidhi doonaan bixiyaha Daryeelka Guriga si ay u bixiyaan daryeelka la aqoonsaday ee ku jira Qorshahaaga Taageerada. Ama, beddelkeeda, haddii aad u baahan tahay hoy la taageeray, degaan ama daryeel kalkaalin, waxay la xiriiri doonaan bixiyeyaashaas oo ay kala hadli doonaan baahiyahaaga oo ay wax badan ka ogaan doonaan waqtiyada sugitaanka. Ujeedada guud waa in si dhakhso leh oo hufan loo daboolo baahiyahaaga si aad u hesho daryeelka uu aqoonsaday qiimeeyahaaga.

Waxaad sidoo kale caawimo ka heli kartaa adeegga u doodista. U dooduhu waa xirfadle madax-bannaan oo adiga dhinacaaga ka socda. Waxay ku taageeri karaan inaad fikradaada ka dhiibato oo ay ogaadaan xuquuqdaada.

U doodayaashu uma shaqeeyaan golaha, NHS, ama bixiyeyaasha daryeelka. Waxay ilaalin doonaan waxyaabaha sirta ah, oo uma baahnid inaad lacag siiso u doodaha. Kala hadal qiimeeyahaaga daryeelka bulshada haddii aad xiisaynayso adeeggan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada iyo ururada kaa caawin kara inaad daboolo baahiyahaaga waxaad ka heli kartaa Help and Support Manchester.
www.manchester.gov.uk/helpandsupportmanchester

**Dib u eegista taageeradaada**
Baahida dadku way isbedeli kartaa waqti ka dib. Si loo hubiyo inaad sii wadato helitaanka heerka saxda ah ee caawimada iyo taageerada, waxaanu dib u eegi doonaa xidhmadaada taageerada ugu yaraan hal mar sannadkii si aan u tixgelino isbeddel kasta oo ku yimaadda duruufahaaga iyo baahiyahaaga. Tani waxay la macno noqon kartaa inaad u baahan tahay taageero yar, xirmadaada taageerada isma beddesho, ama waxaad u baahan kartaa taageero dheeraad ah.

Haddii baahiyahaagu isbeddelaan, waad nala soo xidhiidhi kartaa oo aad diyaarin kartaa dib-u-qiimeyn. Dib-u-qiimayntaadu waxay tixgalin doontaa baahiyahaaga iyo taageerada aan awoodno inaan bixinno, taasoo laga yaabo inay isbedesho.

**Gelida iyo ka bixida cisbitaalka**
Waxaa jiri kara waqti ay tahay inaad isbitaalka u gasho daawayn qorshaysan ama xaalad degdeg ah. Haddii aad horay u sii ogeyd, waa inaad u sheegtaa bixiyayaasha daryeelkaaga magaca cisbitaalka, goorta aad gelayso, iyo inta ay suurtogal tahay inaad joogtid. Waxaa laga yaabaa inaad ubaahatid inaad qorshe sameeysatos si gurigaaga wax laguu qabo, sida in xayawaano lagu ilaaliyo, ama waraaqooyinkaaga laguu fiiriyo.

Haddii aad tahay daryeele qof ama daryeelahaaga uu aadayo isbitaalka, markaa waa muhiim inaad sameyso qabanqaabo kale. Fadlan sidoo kale ka sii eeg macluumaadka habka qiimaynta daryeelayaasha buug-yarahan.

Haddii joogitaanka cisbitaalkaagu yahay xaalad degdeg ah, waa inaad u sheegtaa mid ka mid ah kalkaaliyayaasha qaybtaas sida ugu dhakhsaha badan haddii mid ka mid ah xaaladaha kor ku xusan ay ku saameeyaan. Daryeellayaashu waxay wadan karaan kaadhka xidhiidhka ee "Carers Emergency Card", kaas oo u sheegaya shaqaalaha inay daryeelayaan qof iyo cidda lala xidhiidhinayo. Waxaad wax badan ka heli kartaa qaybta Taageerada Daryeelayaasha ee bogga xiga.

Haddii loo baahdo, marka aad diyaar u tahay inaad ka baxdo isbitaalka, kooxda bixisa (oo ka kooban shaqaalaha bulshada iyo shaqaalaha NHS) ayaa ka wada hadli doona taageerada aad meesha ku hayso si aad u daboosho baahi kasta oo joogto ah oo aad leedahay.

**Taageerada daryeelayaasha**
Daryeelku wuxuu yeelan karaa qaabab badan, oo ay ku jiraan diyaarinta cuntada, wax soo iibsashada, qaadashada qof ballamaha, maaraynta dhaqaalaha, qubeyska, ama musqusha, siinta daawo ama taageero niyadeed, ama dhar dhaqid.

Haddii aad taageerto qaraabo, saaxiib ama deris, da'dooda, jir ahaan ama waxbarashadooda naafanimo awgeed, jirro maskaxeed ama si xun u isticmaalka muqaadaraadka (daroogada ama khamriga) oo aan lagu siin wax lacag ah taageerada aad bixiso, markaa waxaad heli kartaa talo, taageero iyo tababar kaa caawinaya doorkaada daryeel.

**Taageerad anaga ka socota**
Waxaan ognahay in daryeelku uu keeno abaalmarino badan, laakiin sidoo kale waxay noqon kartaa walaac waxayna saameyn kartaa caafimaadkaaga. Waxaan jeclaan lahayn inaad ka fikirto taageero kasta oo aad u baahan karto - waxaa xaafaddaada ka jiri doona koox taageero daryeel, waxaadna xaq u leedahay Qiimaynta Daryeelaha haddii mas'uuliyadahaaga daryeel ay saameeyaan caafimaadkaaga iyo ladnaantaada.

Qiimaynta Daryeelayaashu waa hab wanaagsan oo lagu ogaado taageerada aad heli karto. Daryeelayaashu waxay samayn karaan qiimayn xataa haddii qofka ay daryeeyalaan aysan  helin adeegyo laftooda. Qiimaynta Daryeeleyaasha ayaa kuu ogolaanaysa inaad sharaxdo sida daryeelku u saameeyay caafimaadkaaga iyo ladnaantaada waxayna kaa caawinaysaa inaad ka fikirto waxa dhici doona haddii aadan awoodin inaad daryeesho sabab kasta oo aad samayso Qorshaha Degdegga ah ee Daryeelaha.

**la xidhiidh**
Golaha Magaalada Manchester iyo NHS-ta waxay si wada jir ah ula shaqeeyaan 'Daryeelayaasha Manchester' oo ah shabakad urur daryeel oo maxalli ah. Waxaan ku dhiirigelinaynaa dhammaan dadka leh mas'uuliyadda daryeelka inay ay la xidhiidhaan la xiriiraan  the Carers Manchester Contact Point si ay u ogaadaan taageerada ku caawin doonta, hadda ama mustaqbalka. Waxa kale oo aad ku biiri kartaa Diiwaanka Daryeelaha si aanu la xidhiidhi karnkula xiriirno  wixii ku saabsan adeegyada iyo taageerada deegaanka.

Wax badan baro oo la xiriir:

- Booqo www.carersmanchester.org.uk warbixin
- La hadal mid ka mid ah La-taliyayaashayada Khaaska ah ee Daryeelayaasha La xidhiidh 0161 543 8000 (Isniin ilaa Jimce 10 subaxnimo ilaa 4 galabnimo marka laga reebo fasaxyada bangiga). Saacadaha la kordhiyey waxa la heli karaa Arbacada laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo
- Email - contactpoint@carersmanchester.org.uk
- Haddii aad isticmaasho Facebook ama X (oo hore u ahaan jirtay Twitter), fadlan na sii raac oo la soco wixii cusub - @CarersMcr on X ama ka raadi 'CarersManchester' ee Facebook.

**Noo sheeg qof lagu xadgudbay ama la dayacay**

Haddii qof uu ku jiro khatar degdeg ah, wac 999 oo weydii booliiska.

Nala soo xidhiidh si aad uga warbixiso xadgudubka ama dayacaadda qof weyn oo leh daryeel iyo baahiyo taageero. Xitaa haddii adgiga aadan hubin, anaga noo soo wargeli anga ayaanu xaqiijin doonaa. Waxaad u sheegi kartaa walaacyadaada si qarsoodi ah haddii aad rabto.

Wac: 0161 234 5001
email: mcsreply@manchester.gov.uk

**Waa maxay xadugud?**
Xadgudubku waa marka uu qof ku xumeeyo ama si xun kuula dhaqmo. Waxay qaadan kartaa qaabab badan oo ay ka mid yihiin:

Xadgudub jireed - Tani waa marka uu qof jir ahaan kuu dhaawaco isagoo:

- Ku garaaca
- Laad
- Timaha jiido
- Qanjaruufid
- Luxid
- In lagu siiyo daawo aad u badan si ay kugu adkaato inaad wax sameyso.

Xadgudub galmo - Tani waa marka uu qof kugu sameeyo waxyaabo galmo ah oo kaa dhigaya murugo, cadho, ama cabsi gelin.  Xadgudub galmo ayaa lagu taabtay meel aadan rabin in lagaa taabto, sida:

- Xubnahaaga gaarka ah (guska ama siilka)
- Futada
- Naasahaaga

Xadgudub shucuureed - Tani waa marka ay dadku ku hadlaan waxyaabo xun si ay u dhaawacaan dareenkaaga; ku qayliyo ama ku hanjabaan. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- Lagu caayo

- Laguu qoslo
- Laguugu eedeyo wax aan ahayn khaladkaaga
- Laguula dhaqmo sida ilmo oo kale.
- Laguugu dhega tiro
- Laguugu xukumo waxa aad sameeyso
- Laguugue cabsi geliyo

Laguug xad-gudbo maaliyadeed ama qalab - Tani waa marka qof uu qaato lacagtaada ama alaabtaada isagoon ku weydiin, tusaale ahaan:

- Lacagtaada xado
- Inaad bixiso waxyaalaha dadka kale
- Aan laguu ogolayn inaad go'aansato sida lacagtaada u isticmaasho
- Kharash gareeynaa lacag kasta, ee aad hesho daryeelka inaad ku bixiso  waxyaabaha kale, dad kale, ama ujeeddooyin sharci darro ah.

Dayacid - Tani waa marka dadka ay ahaayeen inay ku caawiyaan aysan adiga si fiican kuu ilaalinin, tusaale ahaan:

- Aan ku siin cunto kugu filan
- Aan ku ilaalinayn diiranaan iyo badbaado
- Aan ku siin daawo
- Aan lagu geyn takhaatiirta haddii aad jiran tahay
- Aan ku siinin dhar nadiif ah oo aad xidhato

Xadgudub takoor ah - Tan waxaa loola dhaqmay si cadaalad darro ah sababtoo ah adiga:

- Waxaad leedahay midab ka duwan
- Diin kale qabtid
- Naafo aaad tahay
- Aad leeday soo jiidasho dadka isku jinsiga ah
- Ku hadasha luqad kale
- Aad tahay da' gaar ah.

Xadgudubka ururka - Tani waa marka dadka ku taageeraya ay sameeyaan wax iyaga u roon, oo aan adiga kuu fiicnayn, tusaale ahaan:

- Ku siiyaan adeeg yar ama doorasho la'aan ku saabsan adeegyada aad hesho
- Xaddidaadda xorriyaddaada si aan loo baahnayn
- Samaynta go'aannada bedelkaaga sida marka aad seexanayso ama kacdo.

Is dayacid - Tani waa marka qofku aanu ama awoodin inuu si fiican isdaryeelo, waxayna dabooshaa hab dhaqan balaaran:

- Dayacid caafimaad ahaan
- Dayacaada nadaafadda shakhsi ahaaneed
- Kaydin lacag
- Aan ilaalinayn waxyaalaha adiga shakhsi ahaan kugu hareeraysan

Xadgudubka guriga - Tan waxaa ku jiri kara nafsi, jireed, galmo, dhaqaale, shucuureed, ama waxa loogu yeero xadgudub 'sharaf ku salaysan'.

Addoonsiga casriga ah - Tan waxaa ku jira ka ganacsiga dadka.

Xagjirnimo - Tani waa habka uu qofku u yimaado inuu ku taageero argagixisada iyo noocyada xagjirnimada ee u horseedaya argagixisannimada. Dadka waaweyn ee khatarta ku sugan waxaa ka faa'iidaysan kara dadka doonaya inay ku lug yeeshaan argagixisanimada ama hawlaha lagu taageerayo argagixisada.

**Maxaa dhacaya ka dib markaad noo sheegto**
Waxaan ku weydiin doonaa inaad faahfaahin ka bixiso xaaladda.

Haddii qof uu ku jiro khatar jireed, tallaabo ayaa laga qaadi doonaa si loo hubiyo inay ammaan yihiin. Xaaladaha kale, tallaabada aan qaadno waxay ku xirnaan doontaa rabitaanka qofka lagu xadgudbayo, iyo sida ay xaaladdu u daran tahay.

Shaqaale tababaran ayaa samayn doona baaritaan taxaddar leh oo xasaasi ah oo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee loola tacaali karo xaaladda. Waxaan bixin doonaa talo iyo macluumaad si qofka lagu xadgudbay uu u sameeyo khiyaar xog ogaal ah oo ku saabsan caawimaad kasta oo la taaban karo oo ay u baahan yihiin ama tallaabo kasta oo ay rabaan inay qaadaan. Haddii qofku aanu awoodin in uu sameeyo khiyaar xog ogaal ah, waxaa laga taageeri doonaa in la taageero oo la ilaaliyo. Tan waxaan ugu yeernaa Badbaadinta.

**Rabshadaha iyo xadgudubka guriga**
Rabshadaha iyo xadgudubka gurigu waxay daboolayaan dhaqamo kala duwan. Kuwaas waxaa ka mid ah xadgudub jireed, shucuureed, galmo, iyo dhaqaale, dhammaan noocyada cilaaqaadka dhexdooda. Tan waxaa ku jiri kara hanjabaad, dhaleecayn joogto ah, go'doomin, xakameynta lacagta iyo galmada qasabka ah. Sidoo kale waa markaa aad bedesho dabeecadada sababtoo ah inaad adiga ka baqdio qof kale. Waxay noqon kartaa lamaanahaaga, lamaanahaaga hore, ama xubin kale oo qoyska ah.

Waxa kale oo ka mid noqon kara waxa loogu yeedho xadgudubka ‘sharaf’ ku salaysan, guurka khasabka ah iyo gudniinka fircooniga ah. Rabshadaha iyo xadgudubka gurigu waxay ku lug leeyihiin dhacdo kasta ama qaab dhacdo oo qof hab-dhaqanka qof kale u geysto xadgudub, iyo halka dadka ku lugta leh ay yihiin da'da 16 ama ka weyn.

Marmarka qaarokood way adag tahay si loo ogaado, adiga isweydii waxyaalahan:

- Lamaanahaaga ama lamaanahaagii hore miyuu handadaa adiga iyo carruurtaada?
- Adiga iyo carruurtaada inta badan ma ka baqaan lammaanahaaga?
- Miyaa laguu yasey oo lagu soo abaarey?
- Ma laguu ogolayn inaad la xidhiidho asxaabta iyo qoyska?

- Lamaanahaagu had iyo jeer ma ku xaqiijiyaa halka aad joogtay, inta aad kharash garaysay, cidda aad la hadasho?

**Maxaan samayn karaa?**
Haddii laguugu xadgudbayo waxaa fikrad fiican tahay inaad la hadasho qof, xitaa haddii aadan rabin inaad wax ka qabatid.  Qof la hadal oo naftaada u hel xoogaa taageero ah. Helitaanka qof xafida dhacdooyinka dhacey waxay ku caawin doontaa mustaqbalka haddii aad go'aansato inaad wax ka qabato.

**Macluumaadka adiga kugu saabsan**

Si aad nooga caawiso inaan fahanno oo aan u daboolno baahiyahaaga waxaan ku waydiisanaynaa inaad na siiso macluumaadka adiga kugu saabsan. Caadiyan, macluumaadkan waa la qori doonaa waxaana lagu hayaa nidaam sugan.

Macluumaadka aan hayno waxaa ku jira magacaaga, cinwaankaaga, iyo taariikhda dhalashada iyo sidoo kale magacyada iyo macluumaadka xiriirka qaraabada iyo daryeelayaasha. Waxaan sidoo kale ururinnaa macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga iyo baahiyahaaga taageerada. Waxaan haynnaa diiwaanka shirarka iyo wixii waraaqo ah ama waraaqo ah oo ku saabsan taageerada aad hesho.

Meesha aan kala shaqayno dadka kale si aan u qorshayno oo aan ku siino taageeradaada waxaan u baahan doonaa inaan la wadaagno macluumaadka iyaga. Waxaan ku weydiin doonaa inaad ogolaato inaan tan sameyn karno.

Waxaa naga go'an inaan xogtaada ilaalino oo sir ah waxaanan leenahay tilmaamo adag si aan u hubino inaan ixtiraamno xuquuqdaada. Waxaad codsan kartaa inaad aragto diiwaanka daryeelka bulshada wakhti kasta.

**Caawinta iyo Taageerada Manchester (HSM)**
HSM waa ilaha khadka tooska ah ee dadka waaweyn, daryeelayaasha dadka waaweyn, saaxiibadooda iyo qaraabadooda kuwaas oo doonaya inay helaan adeegyo taageero iyo fursado balaadhan oo kala duwan si ay kaaga caawiyaan inaad nolosha ugu fiican ka hesho.

Hagahani waxa uu leeyahay macluumaad tafatiran oo ku saabsan in ka badan 2,000 oo adeegyo iyo hawlo ku salaysan bulshada gudaha iyo hareeraha Manchester. Kuwaas waxaa ka mid ah talooyinka ku saabsan faa'iidooyinka, xiisadaha yoga ee dadka naafada ah, iyo sidoo kale fursadaha bulshada iyo adeegyada kale si loo hagaajiyo tayada nolosha dadka deggan.

Si aad ogaate adeegyada kala duwan iyo taageerada aad onleenka:
www.manchester.gov.uk/helpandsupportmanchester

**Sida aad uga qayb qaadan karto**

Golaha Magaalada Manchester  waxaad si aad u qiimeysaa xogta macaamiisha si ay uga caawiyaan qaabaynta iyo bixinta adeegyada waxayna leedahay siyaabo badan oo aad uga qayb qaadan karto, oo ay ku jiraan sahan macaamiisha, codsiyada jawaab celinta, kooxaha macaamiisha iyo wax soo saarka.

Si aad wax badan u ogaatid sida loo lug lahaado wac 0161 234 5001 ama email asccoproduction@manchester.gov.uk

Haddii aad macluumaadkan ugu baahan tahay luqad kale ama qaab kale, sida akhris fudud, far waaweyn, farta indhoolaha ama maqalka, waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa:

Wac 0161 234 5001
Email mcsreply@manchester.gov.uk
SMS Text 07860 003160
Sign-video www.manchester.gov.uk/signvideo

Bogga qoraalada

Si aad u hesho buug-yarahaan mid si fudud loo akhrin karo, far waaweyn, farta indhoolayaasha ama maqalka, waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa:

Wac 0161 234 5001
Email mcsreply@manchester.gov.uk
SMS Text 07860 003160
Sign-video www.manchester.gov.uk/signvideo
Web Waxaad ka heli kartaa faahfaahin adeegyada kale iyo taageero hagaha adeega ee onleenkeena – Help and Support Manchester

http://www.manchester.gov.uk/helpandsupportmanchester